

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD



ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 23^{AAD}

CADADKA 12^{AAD}

TAARIIKH:20/12/23

Lam.13

FAAFINTA RASMIGA AH

OFFICIAL GAZETTE

الجريدة الرسمية

Wax-ka-bedelka Sharciga Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada
Dowladda Puntland.

TUSMADA

Qeybta 1 ^{aad}	<i>Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah Wax-ka-bedelka Sharciga Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Dowladda Puntland.</i>
Qeybta 2 ^{aad}	<i>Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 3 ^{aad}	<i>Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 4 ^{aad}	<i>Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha.</i> WAXBA MALEH
Qeybta 5 ^{aad}	<i>Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda.</i> WAXBA MALEH



DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA



ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتب
الرئيس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 12 ee 20^{ka} December 2023, kuna saabsan Wax-ka-bedelka Sharciga Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Dowladda Puntland.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80^{aad} farqadiisa 16^{aad}.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/77/2023, kuna taariikhaysan 10^{ka} December 2023.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Sharciga Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1^{aad}

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Wax-ka-bedelka Sharciga Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Dowladda Puntland.

Qodobka 2^{aad}

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda

Qodobka 3^{aad}

Dhaqangal Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland


Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland





DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

WAX-KA-BEDDELKA XEERKA SAHMINTA
SAAMAYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA
PUNTLAND

GAROOWE, Desember, 2023

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA



ولاية بونت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:- XGGW/DPL/77/2023 Garoowe, Axad Taariikh:- 10/12/2023

Ku:- Madaxweynaha DPL

Garoowe

Ujeedo: - Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Sahminta Saamaynta
Deegaanka iyo Bulshada Dawladda Puntland

Mudane Madaxweyne,

GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY: -

MARKUU ARKAY: -

Dastuurka Dawladda Puntland Qodobkiisa 64-aad
Soo gudbinta Madaxweynaha Ref:
MW/DPS/106/2023 ee July 3, 2022, kuna saabsan
wax-ka-beddelka Xeerka Sahminta Saamaynta
Deegaanka iyo Bulshada Dawladda Puntland.

MARKUU TIX-GELIYEEY: -

Baahida loo qabo Wax-ka-bedelka Iyo Kaabista
Xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo
Bulshada Dawladda Puntland.

MARKUU DHEGEYSTAY: -

Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga
53-aad, Fadhigiisii 6-aad ee 04.11.2023 cod gacanta
tag ah ku Ansixiyey wax-ka-bedelka Xeerka
Sahminta Saamaynta Deegaanka Bulshada
Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (38)
Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (37) Mudane,
Diidmo majirin, halka uu ka aamusay (1) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEEY:-

Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo
Bulshada Dawladda Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirashiid Yuusuf Jibriil
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.



TUSMO

.....	i
Erey-Bixin	1
CUTUBKA 1aad	2
QODOBO HOR-DHACA AH.....	2
Qodobka 1-aad.....	2
Magaca Xeerka.....	2
Qodobka 2-aad.....	2
Ujeeddada Xeerka	2
CUTUBKA 2-aad.....	3
MAAMULKA IYO MAS’UULIYADAHA.....	3
Qodobka 3-aad.....	3
Hab-raaca Sahminta Saamaynta Deegaanka	3
Qodobka 4-aad.....	3
Waajibaadka Iyo Mas’uuliyadda Wasaaradda	3
Qodobka 5-aad.....	4
Bixinta iyo Diidista Ruqsadda Sahminta.....	4
Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.....	4
Qodobka 6-aad.....	4
Joojinta ama Hakinta Ruqsadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.....	4
Qodobka 7-aad.....	5
Shuruudaha laga doonayo Khubarada /Khabiirka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	5
Qodobka 8-aad.....	5
Abla-ablaynta Mashaariicda lagu samaynayo Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.....	5
Qodobka 9-aad.....	6
Samaynta Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	6
CUTUBKA 3-aad.....	6
DARAASADDA HOR-DHACA AH EE MASHRUUCA.....	6
Qodobka 10-aad.....	6
Samaynta iyo Gudbinta Daraasadda Hor-dhaca ah	6
Qodobka 11-aad.....	7
Faallo ka Dhiibashada Daraasadda hor-dhaca ah ee Mashruuca	7



CUTUBKA 4-aad.....	8
SAMAYNTA DARAASADDA SAHMINTA SAAMAYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA	8
Qodobka 12-aad.....	8
Uruurinta xogta muhiimka ah ee Sahninta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	8
Qodobka 13-aad.....	9
Soo gudbinta warbixinta Daraasadda Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	9
Qodobka 14-aad.....	9
Dib-u-eegista Daraasadda Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	9
Qodobka 15-aad.....	9
Go'aanka	9
Qodobka 16-aad.....	10
Shuruudaha Ansixinta Mashruuca	10
Qodobka 17-aad.....	10
Burinta ansixinta	10
CUTUBKA 5-aad.....	11
KORMEERKA SAAMAYNTA MASHRUUCU KU KEENAY DEEGAANKA IYO BULSHADA	11
Qodobka 18-aad.....	11
Kormeerka Saamaynta Deegaan iyo Bulsho ee Mashruuca	11
Qodobka 19-aad.....	11
Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada.....	11
Qodobka 20-aad.....	11
Xilliyada Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada	11
Qodobka 21-aad.....	12
Diyaarinta Warbixinta Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada	12
Qodobka 22-aad.....	12
Qabashada Kormeerka Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.....	12
Xakamaynta Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada.....	14
Qodobka 25-aad.....	15
Awoodaha Kormeerayaasha	15
Qodobka 26-aad.....	15
Warbixinta Kormeerka	15
CUTUBKA 6-aad.....	16



QODOBO QUBANE AH.....	16
Qodobka 27-aad.....	16
Ballaarinta iyo Wax-ka-bedelidda Mashruuca	16
Qodobka 28-aad.....	16
La Tashiga Bulshada	16
Qodobka 29-aad.....	17
Racfaanka	17
Qodobka 30-aad.....	17
Mag-dhaw	17
Qodobka 31-aad.....	17
Ciqaabaha.....	17
Qodobka 32-aad.....	18
Xeer-Nidaamiyeyaal	18
Qodobka 33-aad.....	18
Burin/Laalid	18
Qodobka 34-aad.....	18
Dhaqan-galka Xeerkan	18
LIFAAQA 1-aad	19
LIFAAQA 2-aad	26
LIFAAQA 3-aad	26



Erey-Bixin

Haddii aan Xeerkan si kale loogu sheegin, macnaha ereyada soo socda waxaa loola jeedaa sidan;

L.r	Ereyga	Macnaha
1.	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka dawladda Puntland ee Soomaaliya.
2.	Wasaarad	Waxaa loola jeedaa Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddelka Cimilada.
3.	Wasiir	Waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Deegaanka iyo isbeddelka Cimilada.
4.	Agaasime Guud	Waxaa loola jeedaa Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada ee Puntland.
5.	Deegaan	Waxaa loola jeeda waxyaalaha inagu wareegsan sida dhulka, biyaha, cimilada iyo hawada dhulka ku xeeran.
6.	Dib-u-eegis	Waxaa loola jeedaa hab lagu hubinayo in daraasadda saamaynta deegaanka iyo bulshada tahay mid lagu kalsoonaankaro oo si sax ahna u daraasaysay saamaynta mashruucu ku yeelan karo deegaanka iyo bulshada.
7.	Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	Waxaa loola jeedaa waa hab loogu talagalay in lagu gorfeeyo, laguna qiimeeyo saamaynta deegaan, bulsho iyo dhaqaale ee uu yeelankaro mashruuca la soo bandhigay.
8.	Ruqsadda Deegaanka	Waxaa loola jeedaa ruqsadda la siiyo hantiilaha mashruuca si uu u bilaabo fulinta mashruuca hab waafaqsan Xeerkan.
9.	Warbixinta Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	Waxaa loola jeedaa warbixinta la soo saaray dhammaadka habraaca daraasadda qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Puntland.
10.	Kormeerka Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	Waxaa loola jeedaa qiimayn habaysan, la diiwaan-gasho oo waqtiyo xaddidan la sameeyo oo ujeeddadiisu tahay in lagu ogaado in loo hoggaansamey shuruudaha ilaalinta deegaanka



		iyo in ay jiraan gol daloolada ka jira maareynta iyo fulinta mashruuca iyo qaadashada tallaabooyinka sixitaan.
11.	Waaxda	Waxaa loola jeedaa waaxda u qaabilsan Wasaaradda arrimaha la xiriira Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.

CUTUBKA 1aad

QODOBO HOR-DHAC AH

Qodobka 1-aad

Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacabayaa “Xeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Puntland.”

Qodobka 2-aad

Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka Xeerkani waa;-

1. Hubinta mashaariicda ka hor intaan la siin oggolaanshaha.
2. In la sameeyo qiimaynta saamaynta deegaanka iyo bulshada si looga hortago saamaynta taban ee mashaariicda qaar ku yeelan karaan deegaanka iyo bulshada Puntland.
3. In lagu wacyigeliyo bulshada saamaynta taban ee mashaariicda qaar ku keeni karaan deegaanka iyo bulshada Puntland.



CUTUBKA 2-aad

MAAMULKA IYO MAS'UULIYADAHA

Qodobka 3-aad

Hab-raaca Sahminta Saamaynta Deegaanka

1. Dhammaan waxqabadyada, mashaariicda ama hawlaha laga fulinayo deegaanka ee ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan waa in lagu sameeyaa daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo bulshada.
2. Wasaaraddu waxay xaq u leedahay inay ku amarto mas'uulka mashruuca inuu sameeyo daraasadda sahmintu, isagoo adeegsanaya khuburo aqoon u leh Wasaaraduna aqoonsan tahay, warbixinta sahmintu saameynta deegaanka nuqul ka mid ah waxaa loo gudbinayaa Wasaaradda, nuqul kale loo gudbiyey mas'uulka mashruuca daraasadda lagu sameeyey, waxaana loo raacayaa sahmintu mashaariicda ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan.
3. Lifaagyada xeerkan waxaa loo aqoonsanayaa in ay yihiin qayb kamid ah xeerkan oo aan ka baxsanayn.

Qodobka 4-aad

Waajibaadka Iyo Mas'uuliyadda Wasaaradda

Wasaaraddu waxay mas'uul ka tahay;-

1. Isku duwidda iyo kormeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada Puntland.
2. Hannaanka dabagalka mashaariicda khatarta sare leh iyo mashaariicda ay suurta gal tahay inay khatar ku keeni karaan deegaanka iyo bulshada Puntland.
3. Dejinta halbeegyada iyo habraacyada Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada hab waafaqsan qodobada xeerkan.
4. In ay dabagal iyo kormeer xilliyeysan ku sameeyaan mashaariicda khatarta sare yeelan karta ee la ansixiyey iyo kala talinta mas'uulka mashruuca tallaabooyinka hagaajinta xaaladaha u hoggaansanaan la'aanta tallaabooyinka hore loo go'aamiyay.
5. Oggolaanshaha ama diidmada mashruuca kadib sahmintu saamaynta deegaanka iyo bulshada.
6. Kormeerka iyo hubinta u-hogaansanaanta ama u hoggaansan la'aanta daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.
7. Caddaynta noocyada mashaariicda ama barnaamijyada ay waajibka tahay in lagu sameeyo dabagal iyo hubin deegaan iyadoo la raacayo xeerkan.
8. Kala talinta mas'uulka mashruuca xaaladaha la xiriira ka qaybgalka bulshada iyo dhegeysi dadwayne marka ay lagama maarmaan tahay in la sameeyo.



Qodobka 5-aad
Bixinta iyo Diidista Ruqsadda Sahminta
Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Shirkad kasta oo dawladeed ama gaar loo leeyahay iyo khabiir kasta oo aqoon u leh, doonayana inay samayso daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada, waxay codsi u soo gudbinaysaa Wasaaradda, si ay u hesho oggolaanshaha samaynta daraasadda Sahminta Deegaanka.
2. Dukumintiyada soo socda waa in ay la socdaan codsiga samaynta Sahminta Saamaynta Deegaanka:-
 - i. Warbixin kooban oo ku saabsan Hay'adda.
 - ii. Faah-faahin Awoodda Hay'adda.
 - iii. Heerka aqooneed ee khubarada shaqada qabanaya.
 - iv. Meeqaamka sharci.
3. Marka Waaxda ku shaqada leh daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada hesho codsiga waa in ay qiimaysaa in dhammaan warqadaha loo baahnaa codsiga la socdaan.
4. Marka la dhammaystiro shuruudaha codsiga sahmintu saameynta deegaanka iyo bulshada ee ku xusan farqadda 2-aad ee qodobkan, Wasiirku wuxuu siinayaa codsadaha oggolaanshaha/ruqsadda daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada.
5. Markii warqadaha la socda codsiga ee ku xusan faqradda 2-aad ee qodobkan, wax ka dhiman yihiin, Waasaaraddu waxay muddo toban (10) cisho ah siinaysaa codsadaha, si uu usoo dhammaystiro warqadaha ka dhiman.
6. Haddii codsadu ku gubin kari waayo xogta, qoraallada iyo warbixinta dheeraadka ah waqtigii loo qabtay, waaxdu waxay kasoo qaadayaan codsigaas mid aan buuxin shuruudihii loo baahnaa.
7. Dhammaan xeel-dheerayaasha Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada waxay bixinayaan lacagta ruqsadda si waafaqsan xeerkan.
8. Shirkadda ama khabiirka la siiyo ruqsadda samaynta daraasadda sahmintu saamaynta deegaanka wuxuu si sannadle ah uga cusboonaysiinaysaa ruqsadda ku xusan faqradda 7-aad ee qodobkan, isagoo bixinaya khidmadda dib u cusboonaysiinta ku xusan Lifaafa 2-aad ee xeerkan.

Qodobka 6-aad
Joojinta ama Hakinta Ruqsadda Sahminta Saamaynta
Deegaanka iyo Bulshada

1. Kadib marka la soo saaro ruqsadda, Wasiirku, isagoo ka duulaya talooyinka Agaasimaha Guud iyo waaxda qaabilsan sahmintu saamaynta deegaanka iyo bulshada waxuu:-



- b) Joojin karaa ruqsadda muddo aan ka badnayn afar iyo labaatan (24) bilood.
- t) Waxuu burin karaa gabi ahaan ruqsadda.
2. Wasiirku waxuu hakin karaa ama burin karaa ruqsadda sida ku xusan faqradda 1-aad haddii:-
- b) Cidda ruqsadda lasiiyey ku xad-gudubto shuruudihii markii horeba lagu siiyey.
- t). Wax laga beddelay mashruuca ama wax iska beddeleen habka loo hirgelinayo.
- j) Mashruucu dhaliyo dhibaato deegaan oo ay adkeyd in la addororso markii Ruqsadda la bixinayey.
- x) La ogaado in xogta uu bixiyay qofka mashruuca mas'uulka ka ahi markii uu soo codsanayey ruqsaddu ay ahayd mid been ah oo aan si sax ah uga tarjumin xaqqiida mashruuca.

Qodobka 7-aad

Shuruudaha laga doonayo Khubarada /Khabiiirka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qof kasta oo danaynaya in Wasaaraddu u aqoonsato khabiiir ama khubaro samayn kara Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada waa in ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:-
- b) In qofku leeyahay aqoon aan ka yarayn heer jaamacadeed oo xiriir la leh mashruuca uu ku samaynayo daraasadda.
- t) In qofku leeyahay waaya aragnimo aan ka yarayn shan (5) sano oo la xiriirta shaqada markaas uu daraasadda ku samaynayo.
- j) In qofka lagu yaqaan shaqo hufan iyo daacadnimo la xiriirta shaqada markaas uu daraasadda ku samaynayo.
- x) In aan qofka maxkamad awood u lihi ku xukumin dembi culus oo kama dambays ah, taasoo dhaawici karta in lagu aamino samaynta daraasadda.

Qodobka 8-aad

Abla-ablaynta Mashaariicda lagu samaynayo Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

Iyadoo la raacayo talo-bixinta waaxda qaabilsan Sahminta Saamaynta Deegaanka, Wasaaraddu waa in ay u kala saartaa mashaariicda;-



1. **Nooca B** : oo ay soo galayaan mashaariicda lagu xusay lifaaqa 1-aad ee xeerkan kuwasoo u baahan in si buuxda loogu sameeyo Sahminta Saamaynta Deegaanka.
2. **Nooca T**: Waxaa kamid ah mashaariicda ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan, kuwaasoo u baahan in lagu sameeyo Sahminta Saamaynta Deegaanka oo hor-dhac ah, iyadoo la eegayo haddii ay jiri karto baahi loo qabo in la sameeyo Sahminta Saamaynta Deegaanka.

Qodobka 9-aad

Samaynta Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

- 1) Haddii uu mashruucu noqdo nooca koowaad, waaxdu waa in ay ka codsataa cidda mas'uulka ka ah mashruuca in lagu sameeyo mashruuca daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada oo Buuxda, iyadoo la tix-raacayo habraaca ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan.
- 2) Mashaariicda soo gelaaya Nooca (t), waaxdu waa inay ku wargelisaa cidda mas'uulka ka ah mashruuca in la qabto Sahminta Saamaynta Deegaanka oo hor-dhac ah sida ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan.

CUTUBKA 3-aad

DARAASADDA HOR-DHACA AH EE MASHRUUCA

Qodobka 10-aad

Samaynta iyo Gudbinta Daraasadda Hor-dhaca ah

1. Mas'uulka mashruucu wuxuu usoo gudbinayaa Wasaaradda daraasadda hor-dhaca ah nooca mashaariicda ku xusan Lifaafa 3-aad ee Xeerkan.
2. Marka la diyaarinayo daraasadda hor-dhaca ah ee mashruuca mas'uulka mashruucu wuxuu ugu yaraan hal shir la yeelanayaa dhinacyada uu mashruucu saamaynta ku yeelan karo oo ay kamid yihiin haweenka, dhallinyarada, dadka naafada ah iyo dadka kale ee nugul si ay ugu sharraxaan mashruuca, saameyntiisa bulsho, dhaqaale iyo deegaan iyo in la helo faallooyin hadal ama qoraal ah oo ku saabsan mashruuca la soo jeediyay, waxaana faallooyinka shirarkaas iyo caddaymaha lagu lifaaqayaa warbixinta daraasadda hor-dhaca ah.
3. Xogta daraasadda hor-dhaca ah waxaa diyaarinaya khabiir ku takhasusay



sahminta deegaanka iyo bulshada, kana diiwaan-gashan Wasaaradda, si waafaqsan xeerkan.

4. Khabiirka samaynta daraasadda hor-dhaca ah, haddii uusan horay uga diiwaan-gashanayn Wasaaradda, wuxuu codsiga diiwaan-gelintiisa u gudbinayaa Wasaaradda, isagoo ku lifaaqaya codsiga, shahaadooyinkiisa, taariikh nololeedkiisa iyo waaya-aragnimadiisa shaqo.
5. Samaynta daraasadda sahmintada deegaanka iyo dib-u-eegista warbixinta hor-dhaca ah, waxaa laga qaadayaa khidmad dhan kun iyo sideed boqol oo doolar (\$1,800), waxayna kamid noqoneysaa dakhliga guud ee dawladda, waxaana looga faa'iideysanayaa fulinta hawlaha Wasaaradda ee ilaalinta deegaanka, iyadoo loo raacayo hab xisaabeedka dawladda.

Qodobka 11-aad

Faallo ka Dhiibashada Daraasadda hor-dhaca ah ee Mashruuca

1. Haddii daraasadda hor-dhaca ah ee mashruucu waafaqsan tahay shuruudaha xeerkan, Wasiirku wuxuu shan (5) maalmood gudahooda kadib marka uu helo warbixinta mashruuca u soo dirayaa nuqul kamid ah daraasadda hor-dhaca ah Hay'adahan soo socda si uu u helo faallooyin qoraal ah afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalintii la helay xogta mashruuca:
 - b) Hay'ad kasta oo dawladeed ee ay khusayso.
 - t) Qaybaha bulshada ee ay khusayso Sahminta Saamaynta Deegaanka.
2. Marka la helo faallooyinka lagu sheegay faqradda 1-aad ee qodobkan ama aan wax faallooyin ah la helin dhammaadka muddada afar iyo toban (14) maalmood ee laga bilaabo taariikhda la helo xogta mashruuca, Wasiirku wuxuu go'aan ka gaarayaa daraasadda hor-dhaca ah.
3. Go'aanka Wasiirka wuxuu noqon karaa mid mashruuca u xaqiijiya in aanu khataro saamayn deegaan iyo mid bulshaba lahayn iyo inuu yahay mid khataro deegaan ama bulsho wata oo u baahan inuu diyaariyo daraasad buuxda oo Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada ah.



CUTUBKA 4-aad

**SAMAYNTA DARAASADDA SAHMINTA SAAMAYNTA DEEGAANKA IYO
BULSHADA**

Qodobka 12-aad

**Uruurinta xogta muhiimka ah ee Sahminta Saamaynta
Deegaanka iyo Bulshada**

1. Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada waxaa la marinayaa dhammaan mashaariicda khatarta sare leh ee nooca Mashruuca 'B' ee ku xusan lifaaqa 1-aad ee xeerkan iyo nooca mashaariicda 'T' ee ku xusan Lifaafa 1-aad ee Xeerkan ee markii lagu sameeyey sahminta hor-dhaca ah ay caddaatay in lagama maarmaan ay tahay in la sameeyo daraasad buuxda oo Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada ah.
2. Mas'uulka mashruucu wuxuu adeegsanayaa khabiir ama koox Khuburo ah oo ka diiwaan-gashan Wasaaradda, si ay u qabtaan daraasadda sahminta deegaanka iyo bulshada oo ay ku jiraan warbixinta uruurinta xogta ee muhiimka ah, iyadoo lala tashanayo waaxda ka hor inta aan la bilaabin daraasadda.
3. Warbixinta uruurinta xogta muhiimka ah waa in ay qeexdaa baaxadda mashruuca, faah-faahinta shaqada, taasoo tilmaamaysa arrimaha muhiimka ah ee lagu wajahayo sahminta saamaynta deegaanka iyo bulshada.
4. Mas'uulka mashruucu wuxuu iska bixinayaa khidmad dhan saddex kun iyo siddeed boqol (\$3,800), taasoo ah dib-u-eegista warbixinta ay soo gudbiyaan khabiirka ama khabarada uu u qabsaday samaynta Daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka, waxayna kamid noqoneysaa dakhliga guud ee dawladda, waxaana looga faa'iideysanayaa fulinta hawlaha Wasaaradda ee ilaalinta deegaanka, iyadoo loo raacayo hab xisaabeedka dawladda.



Qodobka 13-aad
Soo gudbinta warbixinta Daraasadda Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

Mas'uulka mashruucu wuxuu u soo gudbinayaa Wasaaradda shan (5) nuqul oo ah qabyo-qoraalka daraasadda saamaynta deegaanka iyo bulshada, si loogu sameeyo dib-u-eegis.

Qodobka 14-aad
Dib-u-eegista Daraasadda Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Wasaaraddu, waxay dib-u-eegis ku samaynaysaa qabyo-qoraalka daraasadda saamaynta deegaanka iyo bulshada, kadibna waxay samaynaysaa faallo qoraal ah Shan iyo toban (15) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo qoraalka.
2. Haddii marka dib-u-eegis lagu sameeyo qabyo-qoraalka daraasadda saamaynta deegaanka iyo bulshada ay Wasaaradu ku qanacdo inuu dhammaystiran yahay, waxaa Wasiirku ku ogaysiinayaa mas'uulka mashruuca muddo aan ka badnayn afar iyo toban (14) maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helay.
3. Marka warbixinta daraasadda Sahminta deegaanka iyo bulshada la ogaado in aanay dhammaystirnayn, Wasaaradu waxay dib ugu celinaysaa mas'uulka mashruuca si uu dib-u-eegis ugu sameeyo, isagoo tix-gelinaya faallooyinka iyo diidmada Wasaaradda.

Qodobka 15-aad
Go'aanka

1. Wasaaraddu, iyadoo tix-gelinaysa dhammaan habka dib-u-eegista waxay:-
 - b) Ansixinaysaa mashruuca, iyadoo bixinaysa oggolaansho ku meel gaar ah oo ku salaysan caddaymaha la bixiyey.
 - t) U gudbinaysaa mas'uulka mashruuca in wax-ka-beddelis loo baahan yahay la xiriirta in la beddelo tignoolajiyada la adeegsanayo ama goob kale laga hirgeliyo mashruuca.
 - j) Dib ugu celin kartaa mashruuca ama qayb kamid ah mas'uulka haddii aan macluamad ku filan la hayn, si daraasad dheeraad ah loogu sameeyo ama soo gudbinta macluumaad dheeraad ah oo khuseeya deegaanka iyo maamulka bulshada iyo qorshaha kormeerka, si loogu fududeeyo in Wasaaraddu u gaarto



go'aan oggolaanshaha ama diidmada mashruuca.

2. Go'aanka Wasaaradda iyo sababaha waxaa lala socodsiinayaa mas'uulka mashruuca afar iyo toban (14) maalmood gudahood.

Qodobka 16-aad **Shuruudaha Ansixinta Mashruuca**

Marka la gaarayo go'aanka lagu ansixinayo mashruuca, Wasiirku wuxuu:-

- b) Bixiyaa oggolaansho ku xiran shuruudaha loo arko lagama maarmaan.
- t) Tilmaamayaa muddada ay ansixintu shaqaynayso.
- j) Bixinayaa shatiga oggolaanshaha mashruuca.

Qodobka 17-aad **Burinta ansixinta**

1. Wasiirku, isaga oo ka duulaya tala bixinta waaxda wuxuu awood u leeyahay in uu buriyo shahaadada uu horey u bixiyay amaba ansixiyay marka:-
 - b) Ay jirto u hoggaansanaan la'aanta shuruudaha ku xusan shatiga oggolaanshaha Sahminta Saameynta deegaanka iyo bulshada.
 - t) Ay jirto wax-ka-beddel la taaban karo oo lagu sameeyo fulinta ama hawl-galka mashruuca taasoo keeni karta saameyn taban oo deegaanka ah ama bulshada.
 - j) Ay jirto saamayn la taaban karo oo taban lana sii ogayn wakhtigii ansixinta soo ifbaxday.



CUTUBKA 5-aad

KORMEERKA SAAMAYNTA MASHRUUCU KU KEENAY DEEGAANKA IYO BULSHADA

Qodobka 18-aad

Kormeerka Saamaynta Deegaan iyo Bulsho ee Mashruuca

1. Kormeerka deegaanka iyo bulshada ee ku xusan xeerkan, waxaa fulinaya khabiir ama khubaro ku takhasusay kormeerka sahmenta deegaanka iyo bulshada oo ruqsad ka haysta Wasaaradda, si waafaqsan qodobada ruqsad bixinta daraasadda Sahminta deegaanka iyo bulshada ee ku xusan xeerkan.
2. Mas'uulka mashruucu wuxuu iska bixinayaa kharashka dib-u-eegista warbixinta kormeerka ama dabagalka deegaanka iyo bulshada, isagoo bixinaya khidmad dhan labo kun iyo labo boqol oo doolar (USD 2,200), waxayna kamid noqoneysaa dakhliga guud ee dawladda, waxaana looga faa'iideysanayaa fulinta hawlaha Wasaaradda ee ilaalinta deegaanka, iyadoo loo raacayo hab xisaabeedka dawladda.
3. Khabiirka ama khubarada kormeerka Sahminta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada waxaa laga doonayaa inay buuxiyaan shuruudaha ku xusan qodobka 7-aad ee Xeerkan.

Qodobka 19-aad

Mabaadi'da Aasaasiga ah ee Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada

1. Qabashada kormeerka deegaanka iyo bulshada waxaa lagu salaynayaa mabaadi'dan soo socota:-
 - b) Waxaa hawsha kormeerka qabanaya waaxda, si waafaqsan qodobada xeerkan.
 - t) Mas'uulka mashruuca waxa laga doonayaa in uu ilaaliyo oo uu isu dheelitiro ka faa'iidaysiga deegaanka iyo horumarka waara.

Qodobka 20-aad

Xilliyada Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada

1. Dhammaan mashaariicda ay suurtagalka tahay inay saameyn taban ku yeelan karaan deegaanka, waxay khubaro ama khabiir ka diiwaan-gashan Wasaaradda ku samaynayaan kormeerka deegaanka iyo bulshada, si waafaqsan qodobada xeerkan.



2. Si loola socdo khataraha deegaan iyo bulsho ee mashruuc, mas'uulka mashruucu wuxuu kormeer ku samaynayaa labadii sano hal mar haddii mashruucu soconayo Laba (2) sano uuna yahay nooca mashaariicda khatarta yar ee hoos yimaada mashaariicda (t) ee ku xusan Lifaaqa 1-aad ee xeerkan, mashaariicda khatarta sare leh ee hoos timaada mashaariicda ku xusan (b) ee Lifaaqa 1-aad ee xeerkan waxaa kormeerkooda loo samaynayaa si sannadle ah.
3. Haddii muddada mashruucu ka yar yahay hal (1) sano waxaa kormeerka loo samaynayaa si dhaqsa ah, Wasaaraddu waxay samayn kartaa kormeer dheeraad ah haddii loo arko lagama maarmaan.

Qodobka 21-aad

Diyaarinta Warbixinta Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada

1. Warbixinta kormeerka deegaanka iyo arrimaha bulshada waxaa la diyaarinayaa iyadoo la raacayo tilmaamaha guud ee u degsan kormeerka deegaanka iyo bulshada.
2. Isbeddel kasta oo ku yimaadda baaxadda shaqada inta lagu jiro diyaarinta warbixinta deegaanka iyo kormeerka waa in ay ku heshiiyaan dhinacyada kormeerka deegaanka iyo bulshada samaynaya.

Qodobka 22-aad

Qabashada Kormeerka Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada

1. Qabashada kormeerka deegaanka iyo bulshada waa in ay ku jirtaa isticmaalka waydiimo la diyaariyay, booqashada goobaha deegaanka, falanqeyn iyo tijaabooyin waafaqsan xeerkan.
2. Kormeeraha deegaanka iyo bulshada waa inuu:-
 - b) Marka koowaad talada ku darsado sharixidda mashruuca.
 - t) Caddeeyaa ujeeddada mashruuca.
 - j) Qeexaa Baaxadda iyo shuruudaha kormeerka.
 - x) U hoggaansamo xeerka deegaanka iyo xeerarka kale ee nidaamiya caafimaadka iyo bedbaadada iyo isticmaalka joogtada ah ee kheyraadka dabiiciga ah.
 - kh) Xaqiijiyo heerka u hoggaansanaanta mas'uulka mashruucu shuruudaha lagu dejiyay qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada.
 - d) Qiimeeyo wacyiga mulkiilaha, aqoonta iyo mas'uuliyadda ku aaddan ku dhaqanka qodobada xeerkan iyo shuruudaha degsan.
 - r) Dib u eego dukumeentiyada mashruuca ee la xiriira dhammaan kaabayaasha dhaqaalaha iyo nashqadaynta, si loo hubiyo ujeeddada ilaalinta deegaanka iyo



- ka hortagga waxyeelo kasta.
- s) Baaro barnaamijyada la socodka, halbeegyada iyo habraacyada loo dejiyay Xakamaynta iyo sixitaanka tallaabooyinka deg-degga ah.
 - sh) Baaro diiwaannada dhacdooyinka iyo shilalka iyo suurtoagal-nimada dhacdooyin iyo shilal dhici kara mustaqbalka.
 - dh) Lagu daro daraasadda Sahminta nuglaanshaha ka dhalan kara isbeddelka cimilada iyo tallaabooyinka mudnaanta leh kuwaasoo lugu yaraynayo culayska ay keentay isbeddelka cimiladu iyo falalka la qabsiga isbeddelka cimilada.
 - c) Kormeero dhammaan dhismayaasha, goobaha iyo deyrarka ay wax-soo-saarka, tijaabinta iyo isku socodka alaabuhu ka socdaan gudaha iyo dibadda mashruuca iyo sidoo kale meelaha alaabta lagu kaydiyo, meelaha alaabta lagu tuuro iyo in la diiwaan geliyo dhammaan khataraha deegaanka iyo bulshada ee la xidhiidha arrimahan oo kale.
 - g) Baaro oo la helo aragtida kooxda mashruuca, bulshooyinka deegaanka ah, kooxaha nugul ee goobta mashruuca degan iyo dadka kale ee saamayn caafimaad ama nabadgalyo ku yeelan karo mashruucu.
3. Warbixinta kormeerka waxay yeelanaysaa qaabka soo socda:-
- b) Hordhaca kooban ee warbixinta.
 - t) Xogta heerka mashruuca ee hadda.
 - j) Ujeeddooyinka iyo baaxadda kormeerka.
 - x) Hab-maamuuska kormeerka, shuruudaha iyo hababka isticmaalka.
 - kh) Natiijooyinka iyo indho-indhaynta.
 - d) Sharraxaadda arrimaha muhiimka ah oo ay ku jiraan meelaha uu ku wanaagsan yahay iyo meelaha uu ku liito mashruucu.
 - r) Talooyinka.
 - s) Geba-gebada.
 - sh) Liiska dukumeentiyada ama qoraallada la isticmaalay ama lasoo xigtay.
 - dh) Lifaaqyada sawiro, qorshe hawleedka mustaqbalka, la-talinta iyo liiska dadka ay khusayso ee lagala tashaday.
4. Warbixinta kormeerka deegaanka iyo bulshada waa inuu saxiixaa mid kasta oo kamid ah shakhsiyaadka sameeyay kormeerka deegaanka iyo bulshada.



5. Marka la dhammeeyo warbixinta daraasadda kormeerka bulshada iyo deegaanka, mas'uulka waa inuu soo gudbiyaa ugu yaraan Shan (5) nuqul oo daabacan ama sida Wasaaraddu u oggolaato waqtiyada qaar iyo nuqul kamid ah warbixinta oo ah qaab elektarooniga ah oo ku qoran qaabka ku xusan faqradda saddexaad (3) ee qodobkan.
6. Marka la helo warbixinta kormeerka deegaanka iyo bulshada, Wasaaraddu waxay muddo todoba (7) maalmood gudahood ah ugu diraysaa nuqulka warbixinta dhammaan hay'adaha dawliga ah iyo qaybaha bulshada ee ay khusayso.
7. Marka Wasaaraddu ku qanacdo in hawlaha mashruucu u hoggaansameen qorshaha maamulka deegaanka iyo bulshada, isla markaana aanay jirin wax saamayn ah oo deegaan iyo bulsho ah oo uu keenayo, Wasaaraddu waxay bixinaysaa shahaadada u hoggaansanaanta deegaanka iyo bulshada Shan iyo Afartan (45) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda la helo warbixinta kormeerka.

Qodobka 23-aad

Gudbinta Warbixinta Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada

Warbixinta kormeerka deegaanka iyo bulshada waxaa loo gudbinayaa mulkiilaha ama hawl-wadeenka xarunta Afar iyo Toban (14) maalmood gudahood kadib dhammaystirka kormeerka.

Qodobka 24-aad

Xakamaynta Kormeerka Deegaanka iyo Bulshada

1. Xakamaynta baaritaanka kormeerka deegaanka iyo bulshada waa in ay fulisaa Wasaaradda mar kasta oo ay lagama maarmaan u aragto, si loo hubiyo u hoggaansanaanta mashruuca ee qorshaha maareynta deegaanka iyo bulshada.
2. Xakamaynta kormeerka deegaanka iyo bulshada waa in ay xaqiijisaa in mashruucu u hoggaansan yahay qorshaha maareynta deegaanka iyo bulshada ee la dejiyay oo uu xaqiijiyaa ku filnaanshaha tallaabooyinka yaraynta saamaynta taban ee deegaanka.
3. Kormeerka ilaalinta deegaanka iyo bulshada waa in ay sameeyaan kormeerayaasha deegaanka iyo bulshada.



Qodobka 25-aad
Awoodaha Kormeerayaasha

1. Kormeeraha deegaanka ee xeerku awood u siiyay, wakhti macquul ah, wuxuu geli karaa dhul kasta, dhisme ama goob kasta oo mashruuc isaga oo ay ujeeddadiisu tahay kormeer, si uu u baadho diiwaannada iyo inuu wax ka weydiiyo mashruuca mas'uuliyiinta gacanta ku haysa.
2. Kormeeraha deegaanku wuxuu samayn karaa ama sabab u noqo karaa in lagu sameeyo dhaqan gelinta kormeerka deegaanka iyo bulshada xarun kasta oo ay jirto sabab macquul ah oo lagu aamino in:-
 - b) Mas'uuliyiinta mashruucu ay jebinayaan ama ay u badan tahay inay ku xad-gudbaan xeerkan.
 - t) Waxqabadka mashruucu uu keeno khatar deg-deg ah iyo waxyeello caafimaadka aadanaha ama waxyeello aan loo baahnayn oo aan laga soo kaban karin u geystaan deegaanka.
3. Kormeeraha deegaanka waa inuu-
 - b) Si waafaqsan xeerkan ugu diraa mas'uulka mashruuca ogeysiis qoraal ah ugu yaraan siddeed iyo Afartan saacadood ka hor inta aan la samayn kormeerka deegaanka iyo bulshada.
 - t) Ka dalbadaa mas'uulka mashruuca inuu u soo gudbiyo xogta uu u baahan ee la xiriirta kormeerka mashruuciisa muddada la cayimay, iyadoo wargelin ku filan loo dirayo.
4. Qofka diida inuu ka jawaabo su'aalaha, diida inuu isticmaalo dukumeenti ama diida inuu bixiyo macluumaad kale oo uu si sharci ah u raadiyo kormeeraha deegaanku wuxuu gelayaa dembi sida ku cad xeerkan.

Qodobka 26-aad
Warbixinta Kormeerka

1. Kadib marka la sameeyo kormeerka, kormeerayaashu waxay u gudbinayaan warbixinta kormeerka Wasaaradda.
2. Warbixinta kormeerka waa in ay ku jiraan:-
 - b) Magaca iyo ciwaanka goobta shaqada ee mas'uulka mashruuca.
 - t) Magaca mashruuca la soo jeediyay.



- j) Taariikhda fulinta mashruuca la soo jeediyay.
- x) Taariikhda warbixinta kormeerka ee ugu dambaysay oo ay ku jiraan natiijooyinka warbixinta, tallaabada la qaaday iyo natiijada.
- kh) Faah-faahinta xuduudaha deegaanka ee lagu kormeerayo sida ku qeexan Qorshaha Maareynta Deegaanka;
- d) Natiijooyinka shaqada kormeerka dhabta ah.
- r) Tallaabooyin cusub ee la fulinayo oo ay ku jiraan shuruudaha Sahminta soo socota.
- s) Natiijooyinka, gunaanadka iyo talooyinka kooban oo aan farsamo ahayn.

CUTUBKA 6-aad

QODOBO QUBANE AH

Qodobka 27-aad

Ballaarinta iyo Wax-ka-bedelidda Mashruuca

1. Ballaarinta ama wax-ka-bedelidda mashruuc socday, waa in dib-u-eegis lagu sameeyaa.
2. Cidda mashruuca mas'uulka ka ah waxaa waajib ku ah in ay qaaddo dhammaan tallaabooyinka looga baahan yahay ee ku aaddan samaynta daraasadda sahaminta saamaynta deegaanka iyo bulshada.

Qodobka 28-aad

La Tashiga Bulshada

1. Marka lagu guda jiro daraasadda sahaminta saamaynta deegaanka, cidda mashruuca mas'uulka ka ah waa in ay abaabushaa fursad ay kula kulanto dadka bulshada ka tirsan ee iyagu danaynaya in ay wax ka waydiiyaan saamaynta deegaan ee mashruuca ka imaan karta, gaar ahaan dadka ku nool nawaaxiga goobta mashruuca laga hirgelinayo.
2. In dadka deegaanka la siiyo xog ku filan oo ku aaddan mashruuca laga fulinayo deegaanka iyo saameyntiisa.
3. In la diiwaan-gasho welwalka ay bulshada deegaanku ka qabaan saamayn deegaan oo ka soo gaarta fulinta mashruuca.



Qodobka 29-aad

Racfaanka

1. Cid kasta oo mas'uul ka ah mashruuca waxa ay diidmo ka muujin kartaa go'aanka Wasaaraddu ka soo saarto oggolaanshaha mashruuca, waana in ay diidmadaas ugu gudbisaa Wasaaradda muddo 30 casho gudohood ah oo ka billaamaysa maalinka go'aanka la gaarsiiyay mas'uulka mashruuca.
2. Wasiirku waa in uu u magacaabo guddi madaxbannaan oo ka kooban 3 xubnood oo leh khibrad farsamo si ay dib ugu eegaan diidmada la saaray mashruuca, soona gudbiyaan talooyinkooda ku aaddan arrintaas, iyadoo kharashka ku baxaya guddiga uu la baxayo mashruucu.
3. Go'aanka guddigu ka gaaro diidmada mashruuca la saaray waa in aanay noqon mid laga soo qaado kama-dambays ah.
4. Cidda mas'uulka ka ah mashruuca waxay wali xaq u leedahay in ay racfaan u qaadato maxkamad awoodda u leh gelidda dacwadda ku aaddan diidmada la saaray mashruuca.
5. Go'aanka maxkamadu ka gaarto arintaasna waa in laga soo qaadaa mid kama dambays.

Qodobka 30-aad

Mag-dhaw

1. Haddiiba mashruucu uu gaysto dhaawac ama dhib deegaan ama bini-aadmi, waa in la dhaqangeliyaa mabda'a in " dhibgaystuhu ganaax ama magdhaw bixiyo" sida ku xusan Xeerka Ilaalinta Maaraynta Deegaanka, wuxuuna mashruucu mas'uul ka noqonayaa:-
 - b) Magdhaw ka bixinta wixii khasaare naf iyo maalba ah ee uu gaystay.
 - t) Nadiifinta iyo ku soo celinta deegaanka dhibta gaartey sidii uu ahaa dhibaataada ka hor.

Qodobka 31-aad

Ciqaabaha

- 1) Mas'uul kasta oo mashruuc iyo khabiirka/khubarada samaynaya daraasadda sahminta saamaynta deegaanka iyo bulshada oo si ula kac ah u soo gudbiya xog been ah waxa uu galayaa denbi, waxaana uu mutaysanayaa ciqaab u dhexaysa hal sano ilaa



saddex sano oo xabsi ah ama ganaax lacageed oo aan ka yarayn saddex kun iyo shan boqol oo doolar (\$3,500) ama xabsi iyo ganaaxa oo wada socda.

2) Garsooruhu wuxuu ku xukumayaa mas'uulka mashruuca ciqaab la adkeeyay haddii uu:-

b) Denbiga galo hal mar ka badan.

t) Falkiisu sababo khasaare deegaan, dad ama khasaare kale oo kasta oo soo gaara noolaha kala duwan ee dadka iyo deegaanka.

Qodobka 32-aad

Xeer-Nidaamiyeyaal

Wasaaraddu waxay awood u leedahay ayna soo saaraysaa xeer-nidaamiye, wareegtooyin, hageyaal iyo tilmaamo wax lagu saxayo laguna toosinayo oo aan ka hor-imaanayn qodobada xeerkan.

Qodobka 33-aad

Burin/Laalid

1. Waxaa la buriyey xeer iyo xeer-nidaamiye kasta oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin xeerkan.
2. Wixii laga waayo xeerkan waxaa loola noqonayaa xeerarka kale ee aan ka hor-imaanayn Dastuurka Puntland.

Qodobka 34-aad

Dhaqan-galka Xeerkan

Xeerkan waxa uu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda Puntland.



LIFAAQYADA

LIFAAQA 1-aad: ABLA-ABLAYNTA MASHAARIICDA IYADA OO LAGU SALAYNAYO BAAXADDA SAAMAYNEED EE AY KU REEBAYSO DEEGAANKA IYO BULSHADA

MASHAARIICDA B: Mashaariicda u baahan in si buuxda loogu sameeyo daraasadda Sahminta Saamaynta Deegaanka

KALA SOOCIDDA MASHAARIICDA	
KAABAYAASHA IYO ADEEGYADA BULSHADA	
1. Mashaariicda Biyaha iyo Nadaafadda	<ul style="list-style-type: none">• Shaqooyinka Daad moosidda & kanaal jeexidda (markii shaqo wayn tahay).• Biyo-xireenada & biya-qabatinnada (markii shaqo wayn ama mid meel dhexaad ah laga qabanayo).• Goobaha lagu sifeeyo laguna daweeyo biyaha wasakhda ah (si mug weyn).• Bullaacadaha dhulka laga qodayo (markii kuwa waawayn la samaynayo).
2. Mashaariicda lagu yagleelayo goobaha Qashin Qubista	<ul style="list-style-type: none">• Hirgelinta goobaha lagu xabaalo qashinka warshadaha iyo sumaha halista ah.• Samaynta goobaha lagu shubo qashinka warshadaha.
3. Mashaariicda Horumarinta Magaalooyinka	<ul style="list-style-type: none">• Agabyada cusbitaallada & goobaha waxbarashada (markii ay mashaariic waawayn yihiin).
KAABAYAASHA DHAQAALAHA & ADEEGYADA LA HALMAALA	
4. Mashaariicda Gaadiidka	<ul style="list-style-type: none">• Waddooyinka halbawlaha ah ee magaalooyinka.• Waddooyinka cusub ee markaas la yagleelayo.



	<ul style="list-style-type: none"> • Barnaamijyada waddooyinka loogu samaynayo dhulka miyiga. • Rakibidda dhuumaha shidaalka iyo gaaska. • Waddooyinka tareenada ee dhulka hoostiisa mara, kuwaasoo loo isticmaalo gaadiidka rakaabka. • Biyo mareenada dhulka hoostiisa laga yagleelo. • Gagida dayuuradaha soo caga dhigtaan ee leh dherer dhan 2,100 mitir iyo wixii ka badan.
5. Mashaariicda Dekedaha iyo Marsooyinka	<ul style="list-style-type: none"> • Dekadaha ganacsiga. • Dekadaha ku yaalla meelaha u dhaw berriga, kuwaasoo qaadi kara gooshka maraakiibta kuwaasoo sida in kabadan 1,350 tan. • Ballaarinta dekadaha haatan jira si mug weyn.
6. Mashaariicda Tamarta	<ul style="list-style-type: none"> • Xarumaha laga dhaliyo tamarta dhulka hoostiisa ah, taasoo soo saaraysa tamar dhan 300 oo megawatt ama ka badan. • Korontada laga dhalinayo biyo-xireenada (si mug weyn).
CUTUBKAWAX SOO SAARKA	
7. Mashaariicda Beeraha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhulka oo loo beddelo dhul beereed (si mug weyn). • Dhulka oo dib loosoo nooleeyo.
8. Mashaariicda Waraabka	<ul style="list-style-type: none"> • Mashaariicda beeraha ee lagu waraabiyo biyaha dhulka dushiisa socda wixii dhan 500 hiktar. • Mashaariicda waraabka ee gaaraya ilaa 1,000 hektar kuwaas oo ay waraabiyaan biyaha ku keydsan dhulka hoostiisa.
9. Mashaariicda Dhiraynta iyo Kaymaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhir beerista lagu sameeyo goobaha aan dhirta lahayn iyo meelaha laga xaalufiyay dhirta intaba (si mug weyn).



10. Mashaariicda Xoolaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhaqashada lo'da, fardaha iyo ariga IWM (Si baaxad wayn).
11. Mashaariicda Kalluumaysiga & Beeraha/ beero biyoodka	<ul style="list-style-type: none"> • Warshadaha kalluumaysiga.
12. Mashaariicda Qodista, sifeynta soo saaridda iyo samaynta macdanta	<ul style="list-style-type: none"> • Qodista gunta hoose sida gaaska dhulka hoostiisa ku keydsan, olyada iyo biyaha. • Qodista biraha iyo macdanta tamarta soo saara ee ceegaaga oogada sare ee dhulka. • Qodista dhuxul dhagaxa ee dhulka hoostiisa ama dhulka oogadiisa. • Warshadaha laga yagleelo oogada sare ee dhulka ee laga soo saaro dhuxul dhagaxa, shidaalka iyo gaaska dabiiciga ah. <p>Agabka loo adeegsado sifaynta iyo kala hufka macdanta ee goobaha macdanta laga qodo ku yaala (si mug weyn).</p>
13. Mashaariicda Warshadaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhulka warshadaha. • Agabyada ugu muhiimsan ee warshadaha oo ay kamid yihiin kuwaan soo socda:- <ul style="list-style-type: none"> b. Warshadaha sifeeya gaaska ee wax soo saarkoodu dhan yahay 500 tan. t. Warshadaha soo saara sibirka. j. Soo saarista iyo la tacaalidda sumaha (si baaxad wayn) oo ay ku jiraan warshadaha soo saara sumaha isku dhafan. x. Soo saarka iyo raridda sumaha cayayaanka iyo sumaha kale ee halista ah.
14. mashaariicda Dalxiiska	<ul style="list-style-type: none"> • Horumarinta xeebaha (si mug weyn).



15. Dib u dejinta	<ul style="list-style-type: none"> • Mashaariicda dib u dejinta (si mug weyn).
-------------------	---

MASHAARIICDA T: Mashaariicda u baahan in lagu sameeyo Sahminta Saamaynta Deegaanka oo Hor-dhac ah

Abla-ablaynta Mashaariicda:	
Adeegyada iyo Kaabayaasha Bulshada	
1. Mashaariicda biyaha iyo fayodhawrka ee miyi iyo magaalo	<ul style="list-style-type: none"> • Hawlaha lagu gaarsiinayo biyaha iyo nadaafada dhulka baadiyaha ah. • Samaynta bullaacadaha dhulka mara (markii ay baaxad yar yihiin). • Bullaacadaha.
2. Mashaariicda Qashin Qubista	<ul style="list-style-type: none"> • Warshadaha dib u warshadeeya qashinka. • Sameynta goobaha lagu daadinayo qashinka guryaha (si baaxad wayn).
3. Mashaariicda Horumarinta reer miyiga	<ul style="list-style-type: none"> • Mashaariicda ganacsiga iyo Gur-yaynta.
Kaabayaasha Dhaqaalaha iyo Adeegyada	
4. Mashaariicda Waddooyinka	<ul style="list-style-type: none"> • Ballaarinta iyo dayac-tirka waddooyinka waaweyn ee miyiga. • Garoomada diyaaradaha ee leh gagida ay dayuuraduhu caga dhigtaan kaasoo dhererkiisu ka yar yahay 2,100m.
5. Mashaariicda Dekadaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dekadaha qaran ee xamili kara gooshka maraakiibta kuwaas oo sida xammuul ka yar 1,350 tan. • Hagaajinta iyo ballaarinta agabyada dekadaha (si baaxad wayn).
6. Mashaariicda Tamarta	<ul style="list-style-type: none"> • Xarumaha korontada iyo rakibidda xarumaha kale ee soo saara dabka kuwaas oo soo saara heer-kul ka yar 300 oo meegawaad. • Baallayaasha gudbiya ama qaada korontada.



	<ul style="list-style-type: none"> • Koronta gaarsiinta miyiga. • Tamarta cusboonaan karta (dabaysha, biyaha IWM) (si baaxad wayn). • Biyo-xireennada korontada laga dhaliyo ee yar-yar.
CUTUBKAWAX SOO SAARKA	
7. Mashaariicda Beeraha	<ul style="list-style-type: none"> • Daah-furka qaabab cusub oo wax lagu maareeyo sida (abuur kala duwan oo hal meel lagu beero iyo beeraha oo loo isticmaalo mashiino). • Daah-furka abuur cusub si baaxad weyn. • Mashaariicda lagu xakameeyo/yareeyo cayayaanka (si baaxad wayn). • Soo saaridda/samaynta bacrimiyayaasha. • Maareynta iyo dayactirka dhulka biyaha qabta.
8. Mashaariicda Waraabka	<ul style="list-style-type: none"> • Mashaariicda waraabka biyaha dusha ceegaaga, kuwaasoo dooolaya 100-500 oo hektar. • Mashaariicda waraabka ee biyaha dhulka hoostiisa, kuwaasoo daboolaya inta u dhaxaysa 200-1000 hectar.
9. Mashaariicda Kaymaha	<ul style="list-style-type: none"> • Kaymaha la xirmeeyo (kuwa baaxadda wayn). • Isku dhafka Kaymaha iyo beeraha. • Kaymaha la xirmeeyo ee wax soo saarka leh (kuwa baaxadda wayn).
10. Mashaariicda Xoolaha	<ul style="list-style-type: none"> • Dhaqashada lo'da wixii kabadan 50 madax, xanaannada digaaga kabadan 500 oo madax.
11. Mashaariicda Kalluumaysiga iyo xannaanaynta noolaha biyaha lagu dhax	<ul style="list-style-type: none"> • Beer biyood si baaxad leh loo beeray (kuwa baaxadda wayn). • Beer biyood baaxad leh in kabadan 50 hector ama kabadan 10 hector. • Kalluumaysiga yar yar (kuwa baaxadda wayn). • Tijaabinta noocyo cusub. • Hindisidda qalab cusub oo kalluunka lagu dabto.



barbaariyo (Beer Biyood)	
12. Mashaariicda Soo saarista iyo samaynta macdanta	<ul style="list-style-type: none"> • Soo saarista macdanta sida (marmarka, ciidda, quruuruxa, cusbada, foosfaytka, botaashka. • Soo saarista waxyaabaha aan birta ahayn ama macdanta tamarta leh/soo saarta.
13. Mashaariicda Warshadaha	<ul style="list-style-type: none"> • Warshadaha beeraha ay kamid yihiin wax-soo saarka qudaarta iyo subaga, soo saarista, xirxirida iyo qasacaynta wax soo saarka xoolaha, kalluunka iyo qudaarta. • Soo saarista alwaaxyada iyo waraaqaha (si baxaad wayn). • Warshadaha hargaha iyo warshadaha sameeya maaska. • Soo saarista walxaha kiimikada ah ay ka mid yihiin sunta cayayaanka (si baaxad yar). • Warshadaha isticmaala walxaha sunta ah (si baxad yar).
14. Mashaariicda Dalxiiska	<ul style="list-style-type: none"> • Meelaha la degan yahay sida huteelada iyo guryaha (si baaxad wayn). • Adeegyada (baaxadda wayn), sida biyaha, tamarta, nadaafada iyo qashin qubista. • Agabyada (baaxadda wayn), sida isticmaalka xeebaha, dib u casriyaynta dekadaha iyo xarumaha lagu damaashaado. • Dalxiiska sabo deegaaneedka ama dalxiiska ku qotoma dhaqanka (kuwaasoo ku xiran ilaalinta iyo xanaaneynta sabo deegaannada muhiim ka ah, dhirta ama xayawaanka; ama sidoo kale bulshooyinka caanka ku ah hiddaha iyo dhaqanka).
15. Guriyeynta	<ul style="list-style-type: none"> • Dhammaan qorshayaasha ama mashaariicda guriyeynta ama dejinta.
MASHAARIICDA C: MASHAARIICDA AAN U BAAHNAYN DARAASADDA SAHMINTA SAAMAYNTA DEEGAANKA	
Mashaariicda Waxbarashada	<ul style="list-style-type: none"> • Agabka waxbarashada (baaxadda yar). • Agabka iyo qalabka wax dhigista/barista.



	<ul style="list-style-type: none"> • Deeqaha waxbarasho. • Macallimiinta iyo shaqaalaha. • Soo saarista barnaamijyada maqalka iyo muqaalka. • Tababarrada.
Mashaariicda Caafimaadka	<ul style="list-style-type: none"> • Xarumaha Caafimaadka (baaxadda yar). • Sahayda iyo qalabka caafimaadka. • Shaqaalaha caafimaadka iyo ku hawlanayaasha caafimaadka bulshada. • Tababarada. • Nafaqada.
Dadka	<ul style="list-style-type: none"> • Qorshaynta qoyska.
Kaabayaasha Dhaqaale iyo Adeegyada	<ul style="list-style-type: none"> • Cilmi baarista.
Qaybaha wax soo saarka	<ul style="list-style-type: none"> • Ganacsiga (marka laga reebo ka ganacsiga alwaaxda iyo qoryaha, noolayaasha dabar go'aya iyo waxyaabaha sunta ah).
Qaybaha kala duwan	<ul style="list-style-type: none"> • Barnaamijyada iyo Mashaariicda yar yar (lacagaha iyo adeegyada baaxadda yar).
Taakule dhaqaale	<ul style="list-style-type: none"> • Barnaamijyada taakuleynta.
Gar-gaarka Deg- degga ah	<ul style="list-style-type: none"> • Deeqaha cuntada ah. • Mucaawinada qaxootiga, barakacayaasha iyo dadka dib ugu noqonaya guryohoodii.
Taageeridda farsamo	<ul style="list-style-type: none"> • Daraasaadka oo ay kamid yihiin qiimaynta. • Taakulaynta farsamo ee fulinta mashaariicda. • Taakulaynta farsamo ee dejinta siyaasadaha. • Kormeerida iyo dabagalka shaqooyinka. • Awood kobcinta hay'adaha heer dawladeed iyo heer degmo.



LIFAAQA 2-aad: TACRIIFADA DIB U CUSBOONAYSIINTA RUQSADDA SAHMINTA SAAMAYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA

Nooca	Muwaadin	Ajanabi
Sarkaal sare khabiirka hogaaminaya daraasada Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	50\$	\$100
Sarkaal xigeen -kaaliyaha khabiirka hogaaminaya daraasada Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	40\$	100\$
Shirkad ku takhasustay Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	200\$	\$300

LIFAAQA 3-aad: TACRIIFADA RUQSADDA KHUBARADA SAMAYNAYSADA DARAASADDA SAHMINTA SAAMAYNTA DEEGAANKA IYO BULSHADA AMA KORMEERKA

Nooca	Muwaadin	Ajanabi
Tacriifada diiwaan-gelinta sarkaal sare -xeel Dheere	\$ 200	\$300
Sarkaal xigeen - kaaliyaha khabiirka hogaaminaya daraasada Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	\$100	\$200
Shirkad ku takhakhustay Qiimaynta Saamaynta Deegaanka iyo Bulshada	\$500	\$1,000

